

# Hagaha Kaqaybqaataha

## Caafimaadka iyo Badqabka II – Daryeelka Carruurta ee Qoyska

Dib loo saxay 2023


2 saacadood

**Xuquuqda lahaanshaha iyo Xadidnaanta Isticmaalka iyo  
Mas'uuliyadaha ka dhalanaya**

Manhajkaan waxaa lagu diyaariyay maalgalin ay bixisay Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota. Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota wax wakiil ah kama ahan wax mas'uuliyad ahna kama saarna isticmaalkiisa ama natiijadiisa. Manhajkaan dib looma soo saari karo, lama koobin karo, lama iibin karo ama si kale looma qaybin karo ayada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota.

Si aad u codsato oggolaansho qoraal ah oo ku saabsan isticmaalka ama dib usoo saarista qayb kamid ah manhajkaan, iimayl u dir [DHS.Child.Care@state.mn.us](mailto:DHS.Child.Care@state.mn.us).

**Si aad u hesho tixraacyada tababarka  
dheeraadka ah, khayraadka, buugaagta  
iyo waxyaabo kale, [booqo bogga](#)  
[khayraadka koorsada oo lifaaqiisu halkaan](#)  
[ku jiro](#) ama aad ka helayso koodhka QR  
ee dhanka midig!**



### Guudmarka Casharka

**Qaybta Nuxurka Hanaanka Aqoonta iyo Howlkarnimada (KCF, Knowledge and Competency Framework) Iyo Qaybaha Nuxurka CDA**

Nuxurka Hanaanka Aqoonta iyo Howlkarnimada Iyo Qaybaha Nuxurka CDA halkaan ayay ku qoranyihiin si ay ka qaybqaateyaasha uga caawiyaan fahamka kartiyada iyo/ama nuxurka waxyaabaha looga hadlaayo tababarkaan.

**Qaybta Nuxurka KCF:** VII: Caafimaadka, Badqabka, iyo Nafaqada – 2 saacadood (Heerka 1)

**Qaybta Nuxurka CDA:** Qorsheynta deegaan waxbarasho oo badbaado iyo caafimaad qaba.

## Ujeedooyinka Waxbarashada:

Ayada oo tababarka kaliya uusan xaqiijinayn ujeedooyinka waxbarashada, hadana waxaa loo qaabayn karaa in lagu gaaro yoolal gaar ah oo loogu tala galay arday walba. Haddii ardaydu noqdaan kuwo wadashaqayn iyo ka qaybqaadasho leh, waxay awoodi doonaan inay:

- Aqoonsashada heerarka ruqsad bixinta ee Xeerka 2 ee MN iyo dhaqamada ugu fiican ee badqabka.
- Inay aqoonsadaan qaababka ay uga sii tabaabushaysan karaan si loo xaqiijiyo badqabka dhismaha iyo goobaha.
- Inay balaariyaan qorsheynta xaalada degdega ah iyo ka jawaabidda xaaladaha degdega ah.

## Ujeedada Kulanka:

- A. Horudhaca
- B. Badqabka Dhismaha iyo Goobaha; Xogta Buug Tusmeedka
  - a. Khataraha gudaha barnaamijka iyo aaga banaanka ee lagu ciyaaro
  - b. Kormeerka Firfircoon
  - c. Xogta Aqoonsiga Waxyabaha Khatarta Keenaaya
  - d. Agabka Maareynta Badqabka iyo Kaydinta waxyaabaha Khatarta ah
- C. U Diyaarsanaanta Xaaladaha Degdega ah
  - a. Aqoonsiga Xaaladaha Degdega ah ee jiri Kara
  - b. Qorsheynta Ka Jawaabidda Xaaladaha Degdega ah
  - c. Ku tababarashada Ka Jawaabidda Diyaarsanaanta
- D. Qorsheynta Awoodaha iyo Baahiyaha Kala Duwan
- E. Soo koobida iyo Dib u milicsiga

## Badqabka Dhismaha iyo Goobaha

Waxyaabaha soo socda waa qaar kamid ah aagaga muhiimka ay tahay in aad ka fakarto inta aad daryeelayso carruurta. \* *Waxyaabaha loo baahan yahay*, sida ku qoran xeerarka daryeelka carruurta.

- ☐ **\*Bareysyada korontada:** Waa in la daboolaa marka aan la isticmaalayn. Fiilooyinka qaybisada waa in aan la isticmaalin badelka fiilada rasmiga ah (waa in aan la marsiin hoosta albaabada ama roogaga), dhammaan fiilooyinku waa inay badqabaan.
- ☐ **\*Sunta/wasaqda bii'ada** ee labadaba gudaha iyo banaanka, ayna ku jiraan saxarooyinka waa in la nadiifiyaa, aysana taaban carruurta.
- ☐ **Waxyaabaha deegaanka laga helo ee keena cudurka neefta:** ka sifee aaga qiiqa tubaakada, dhiqlaha, baranbarooyinka, xayawaannada rabaayada ah, caaryada, qiiqa ka yimaada xaabada ama cawska gubanaaya. Sunta hawada banaanka (ee ka timaada warshadaha, gaariyaasha, iyo ilaha kale ayaa kicin kara xanuunka neefta; eeg odorasaha tayada hawada oo gudaha ku jir marka heerarku sareeyaan). Ka timid Centers for Disease Control and Prevention, eeg “Waxyaabaha Guud ee Kiciya xanuunka Neefta”: <http://www.cdc.gov/asthma/triggers.html>
- ☐ **Xayndaabka:** *\*ayaa\* loo baahan karaa* si loo helo difaac ka dhan ah wadada tareenka, wadooyinka, biyaha, ama khataraha mashiinka. *Lagu taliyay*—Aaga ciyaarta banaanka oo lagu xiray xayndaab ama difaacyo dabiici ah taas oo aan ilmaha kaa qarinnayn. Ganjeeladu waa inay noqdaan kuwo iskood isku xiraaya ayna leeyihiin qataaro ayagu isxiraaya.

- **\*Hubka:** Dhammaan hubka waa in laga saaraa xabadaha oo la gashaa meel aysan geli karin carruurtu. Rasaasta iyo qoryaha waa in lagu xareeyaa qaanado xiran oo kala gaar ah.
- **Aalabaha Guryaha:** Waa in meel lagu dajiya si aysan u soo dhicin (armaajooyinka dhaadheer, qaanadaha buugaagta). Waa in lagu xiraa darbiga si aysan u soo dhicin.
- **\*Xakameynta cayayaanka** —xakameynta cayayaanka iyo xasharaadka, waa in aan kiimiko lagu buufin cayayaanka iyo xasharaadka marka ilmuhu joogaan. *Lagu taliyay*—barnaamijka xakameynta cayayaanka oo isku dhafan oo ay ku jiraan cayrinta cayayaanka, nadaafada iyo xakameynta qashinka, iyo baabi'inta xaaladaha keeni kara in cayayaan meesha ku uruuro; ka fakar tallaabooyinka kahortaga ah si loo yareeyo kaneecada, shinnida, iwm.
- **\*Xayawaanka rabaayada ah ee goobta jooga:** Dhammaan xayawaannada rabaayada ah waa inay caafimaad qabaan; talaalka raabiyada iyo sumad waa in ay leeyihiin eeyyada iyo biisadaha; waa in la kormeeraa marka ay ilmaha la joogaan; qoladaha xayawaanka rabaayada ah waa in la helaa oo lagu nadiifiyaa meel ka fog aaga cuntada lagu diyaarsho, la gasho, ama lagu cuno; aagaga ciyaartu waa in aysan lahayn qashinka xayawaanka; waalidiinta waa in loo sheegaa isla maalintaba marka maqaarka ilmahoodu jeexmo kadib qaniinyada ama xagashada xayawaanka.
- **Qalabka ciyaarta, banaanka:** Qalabka waa in aan lagu rakibin dusha ama aaga meelaha adag sida laami ama shub. Waa in aysan oolin waxyaabo afaysan ama caarad leh; waa in aysan dabcin, lahayn qaybo daxalaystay; aysan lahayn suuman iyo xargo ilmaha ceejin kara; talfiiqyo dadka mudi kara, jeexi kara, ama jebin kara maqaarka; ama agabka khatarta ah sida riinjiga dalawandiga.
- **\*Aaga ciyaarta, banaanka:** Kormeerka goobta; xiristiisa marka loo baahdo (eeg "Xayndaabka"); waa in uusan oolin qashin, wasaq, agabka sunta ah, geedaha sunta ah, khataraha biyaha, mashiinka, gaariyaal furan, qashinka dadka ama xoolaha, iyo bulaacad.
- **\*Aaga ciyaarta, gudaha:** waa inaysan lahayn qashin sababi kara dhuun istaag, ceego, mudid, iwm. Hubi aagaga diyaarinta cuntada, qolka dhar dhaqaalka, musqulaha, oo ka dhig gurigaaga mid aysan ilmuhu khataraha geli karin.
- **\*Jaranjarada:** Haddii ay jiraan 3 jaranjaro ama ka badan, waa in ay leeyihiin meel la cuskado, albaabo ama difaacyo loo adeegsado carruurta jira 6–18 bilood; jaranjarooyinku waa in ay leeyihiin nal wanaagsan oo aysan dayacnayn; waa inuusan oolin wax qashin ah.
- **\*Barkadaha dabaasha:** Waa in aysan geli karin carruurtu marka laga reebo inta lagu jiro isticmaalka la kormeeraayo. Waa in uu kormeeraa kormeere u tababaran gurmada degdega ah iyo naf badbaadinta.
- **\*Badqabka boonbaleyaasha/agabka,** agabka farshaxanka iyo naqshada: Mindiyaha, taraqyada, bacaha caaga ah, iyo khataraha kale waa in laga fogeeyaa carruurta ku jira daryeelka. Isticmaalka *la kormeeraayo* ee agabka khatarta ah iyo aalabaha.
- **Gaariyaasha socda:** WAXAA loo baahan karaa xayndaab u dhexeeya fagaaga iyo wadada gaariyaasha.
- **\*Heerkulka Biyaha:** Sinkiyada iyo baafafka ay geli karaan carruurtu, heerkulku biyuhu waa inaysan dhaafin 120 digrii Fahrenheit.

## Kormeerka Badqabka

Adoo adeegsanaaya (1) Hubinnada badqabka maalin kasta – kormeerada goobaha iyo (2) Kormeerka Firfircoon.

- **Hubinnada badqabka ee maalin kasta ee goobta:** Hubi maalin kasta si loo xaqiijiyo in goobta ay adeegsadaan ilmuhu aysan lahayn khataraha la yaqaano.
- **Kormeerka firfircoon:** Si toos ah u kormeer ilmaha dhashay, socod baradka, iyo ilmaha da'da dugsiga meel aad uga jeedo ama ka maqlayso aadna awoodo in aad soo faro geliso. Kormeer ilmaha hurdo adoo dhagaysanaaya codkooda; si joogto ah u soo fiiri. Ilmo dhashay oo dhibaataysan ayaan badanaa sameyn wax cod ah! Taxadarada dheeraadka ah ee badqabka inta lagu jiro nashaadaadka qaarkood, sida dabaashada. Ilmaha kayar da'da 5 sano waa in aan marna looga tagin gudaha ama banaanka keligood.

## Si aad u hesho xog dheeraad ah

Waaxda Adeegyada Dadwaynaha ee Minnesota. (2016, Agoosto). [Tusmada: Geedaha Sunta ah ee goobta Daryeelka Carruurta ee Qoyska](#)

## Maareynta Badqabka iyo Kaydinta waxyaabaha Khatarta ah

**Nadaafada iyo Caafimaadka:** Maadooyinka sunta ah— *“Dhammaan daawooyinka, kiimikooyinka, saabuunaha, gedaha sunta ah, cabitaannada khamrada, iyo maadooyinka kale ee sunta ah waa inaysan heli karin carruurtu. Waa in lagu kaydiyaa meel ka fog agabka cuntada. Qalabka ama boonbaleyaasha kuwaas afka la gashto ama la ruugi karo waa in aysan lahayn riinjiga dalawandiga ka samaysan. Boonbaleyaasha iyo qalabka leh jajabka, dilaaca, ama riiniga soo fuqay waa in laga baaraa si loo xaqiijiyo in aysan ku jirin dalawandi ama la badelaa”* – Xeerka 2, Minnesota Department of Human Services

**Agabka khatarta ah** waa maadooyinka kuwaas oo:

- sababa khatar haddii la neefsado ama la liqo, ama haddii ay maqaarka taabtaan.
- dab kicin kara, daxalaysanaaya, sunta, ama falcelin leh

Kuwa ugu badan ee waxyeellada u gaysanaaya carruurta waa maadooyinka la isku qurxiyo iyo agabka daryeelka shaqsiga ah, agabka nadiifinta, iyo daawada. Tusaaleyaasha dheeraadka ah: kiimikooyinka barkadda dabaasha, geedaha sunta, cabitaannada khamrada, riinjiga sunta dalawandiga ka sameysan, radon, maadooyinka nadiifinta ee daxalka fujiya, iyo xayndaabyada.

### Taxadarada badqabka

Bixiyaha iyo carruurta si loogu dhaqo faraha saabuun iyo biyo kahor iyo kadib cunto karinta ama cunto cunista, xafaayad badeidda iyo adeegsiga musqusha, maareynta dheecaanka jidhka, maamulida xayawaannada ama nadiifinta qasaqda xayawaannada, maamulida qashinka.

### Maamulidda agabka khatarta ah

- U adeegso sida ay ku taliso shirkada samaysay.
- Haku qasin alaabaha kale.
- Haawi aaga marka aad adeegsanayso agabka nadiifinta iyo jeermis dilista.
- Ha adeegsan marka carruurtu kuu dhow yihiin.

### Kaydinta badqabka leh

- Ku hay qasaca orjinaalka ah, adoo calaamadinaaya.
- Ka fogee meelaha ilmuhu gaaraan, geli qaanado xiran/awdan marka ay suurtagal tahay.
- Geli meel ka soocan cuntada.
- Ku dhaji lambarka Xarunta Xakameynta Sunta meel u dhow aaga lagu kaydiyo maadooyinka kahtarta ah.

### Si badqab leh u fogeynta agabyada khatarta ah

Agabka khatarta sunta dheeraadka ah leh, la xiriir degmadadaada si aad u hesho barnaamijyadooda fogaynta maadooyinka khatarta badan. Maadooyinka kale (sida saxarada eeyga), ku rid meel aysan gaarin karin carruurtu.

### Si aad u hesho xog dheeraad ah

- Wixii quseeya xaaladaha degdega ah ee sunta ama su'aalo ku saabsan sunta, la xiriir Nidaamka Xakameynta Sunta ee Minnesot: Wac **1-800-222-1222** ama booqo <http://www.mnpoison.org/>
- Wakaaladda Ilaalinta Deegaanka ee Mareykanka: Qashinka Khatarta ah ee Guriga (HHW): Waxaa laga soo xigtay: <https://www.epa.gov/hw/household-hazardous-waste-hhw>

## U Diyaarsanaanta Xaaladaha Degdegga ah

### 1. Dib u Eeg oo u Cusboonaysii Si Joogto ah

- It is required that you have a written plan; always access and review to stay up to date with the most recent “[Emergency Preparedness Plan](#)” (note: providers are no longer required to post or share their full emergency preparedness plans with parents or guardians; however, you must continue to make the plan available for review).
- Si joogto ah u cusboonaysii—3 jeer sanadkii ayaa lagu talinayaa—iyo marka xogta qoysku isbeddesho. Qorshaha waa in lagu daraa sida aad boos u siinayso ilmaha dhashay, socod baradka, iyo ilmo kasta oo qaba baahiyo kala duwan marka ay jiraan xaaladaha degdegga ah (tusaale, xasaasiyadaha, caafimaadka, daawada, isku socodka, iwm.).
- Nuqullada kala duwan ee liiska xiriirka la cusbooneysiisay, mid waa inaad dhigtaa meel u dhow albaabka guriga, hal waa inaad qaadataa marka aad safrayso, hal waa in la dhigaa goobta gabaadka ee guriga dhexdiisa.
- Providers can use copies of page one of the [FCC Admission and Arrangements form](#) as the child specific data. Bixiyaashu waa inay haystaan nuqullada xogta ilmaha oo lala diyaarshay agabkooda xaalada degdegga ah, laakiin waa in aysan xogta ilmaha raacin qorshahooda ama aysan siin xogta ilmaha waalidiinta ayadoo qayb ka ah [qorshaha](#).

### 2. Ku tababar naftaada ka jawaabidda xaaladaha degdegga ah.

- Tababarka CPR iyo gargaarka koowaad, sida shardigu ku ah ruqsadda.
- Bar carruurta waaweyn shaqada aasaasiga ah ee wicista 9-1-1 marka ay jiraan xaalado degdeg ah.

### 3. Ilaali badqabka gurigaaga iyo gaarigaaga oo diyaari.

- Aalada sheegta qiiqa ee dabaq kasta iyo aagaga la maro ee banaanka qolalka carruurta daryeelka ku jira seexdaan iyo dab damiska, sida lagu shardiyay ruqsada.
- Aaladaha sheega kaarboon mono oksaydhka waa in lagu xiraa meel 10 fiid u jirta qol kasta oo loo adeegsado hurdo
- Abuur marinada dabka looga baxsado guriga oo ka ilaali in wax isku gooyaan.
- Ku hayso agabka xaalada degdegga ah gurigaaga iyo dhammaan gaariyaasha: qorshaha xaalada degdegga ah, kiishada xaalada degdegga ah iyo buugga, tooshka leh baytariyada dheeraadka ah, raadiyaha baytariga ku shaqeeya, taleefanka, iyo xogta xiriirka waalidka.
- La tasho DHS: [Liiska Hubinta Shati-bixinta Daryeelka Carruurta ee Qoyska](#). Waxaa ku jira faahfaahinta badqabka guriga

### 4. Difaac ganacsigaaga daryeelka carruurta.

- Caymiska, oo uu ku jiro caymiska aadka haddii loo baahdo.
- Kaydinta badqabka leh ee diiwaannada daryeelka carruurta.

### 5. Baro nidaamyada digniinta xaalada degdegga ah ee deegaankaaga

- Digniinaha Xaaladda degdegga ah ee Ateeno La'aanta ah (WEA) waa fariimo loo diro taleefanada gacanta. Gal bogga maareynta xaalada degdegga ah ee degmadaada (ama wac) si aad u ogaato sida aad ku helayso digniinahaan.
- Raadiyaha Cimilada ee NOAA (nuqulka dhammaan khataraha). Waad soo iibsaa kartaa waxaadna xogta ka haysaa [goobahaan gudaha Minnesota](#).
- Ganbaleellada digniinta ee banaanka. U sharax tan qoysaska soo galootiga cusub ah ee carruurtoodu ku jirto daryeelkaaga.
- Raadiyaha iyo taleefishinka warbaahnta ganacsiga. La soco marka aad aragto cimilo xun ama dhibaato kale.
- Raadiyaha baytariga ku shaqeeya. Dhig mid goobta gabaadka ee gurigaaga lacala haddii korontadu tagto.

6. **Aqoonso khataraha iyo ilaha xogta ee xaaladaha degdega ah ee gaarka ah ee xaafada aad dagan tahay.**
  - Tusaaleyaasha: geedaha kiimikada, wadooyinka iyo jidadka waaweyn, dhunta daadka, warshada tamarta nugeerka.
  - La xiriir maamulaha xaalada degdega ah ee degmadaada si loo ogaado haddii ay jiraan khataraha kale ee gaarka ah ee xaalada degdega ah ee xaafadada.
  - La shaqee qof daris ah si uu kusime kuugu noqdo haddii (1) ay qasab noqoto in aad baxdo ayadoo lagu jiro xaalad degdeg ah, ama (2) haddii adiga iyo ilmuhu u baahan tihiiin hooy ku meel gaar ah marka ay go'an yihiin adeegyada guryaha (korontada, biyuhu go'aan). Xog dheeraad ah ayaa laga heli karaa [142B.74](#)
7. **Qorshee oo samee tababar sida aad uga jawaabayso khataraha xaaladaha degdega ah oo qaybo ka mid ah qorshahaaga la wadaag waalidiinta. Xaqiiji in waalidiintu ay haystaan xogta xiriirka si ay kuula soo xiriiraan haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah. Saddex ikhtiyaar oo jawaab bixin ah, iyadoo ku xiran xaalada degdega ah:**
  - **Ka bax dhismeyaasha:** Qorshee sida aad ilmaha banaanka ugu bixinayso, adiga oo si gaar ah u tixgelinaaya ilmaha dhashay iyo carruurta leh awoodaha kala duwan. Doorro meel banaanka guriga ah halkaas oo qof kasta la isugu imaan doono.
  - **Goobta gabaadka:** meel amaan ah oo gurigaaga kamid ah. Marka ay jiraan xaaladaha degdega ah ee cimilada, ka fogaaw albaabada iyo daaqaadaha qolka salka hoose ee guriga oo lagu adkeeyay shubka. Hoosta ka xirta meesha marka aad ka cararaysaan dhacdada rabshada leh.
  - Ku **karantiil** meel xiran oo ka soocan dadka kale (haddii uu cudur caabuuq faafa uu dilaaco). U sheeg waalidiinta inay ka xeeyaan carruurta xanuunsan sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah si looga hortago faafidda cudurka. Dhageyso tallada ka timaada maamullada ruqsad bixinta ee la xiriirta aafada hargabka haddii uu dilaaco.
8. **Samee tababar qorshahaaga.**
  - Doorro wakhti inta lagu jiro bisha markaas oo hawshaan si joogto ah loo sameyn karo, sida marka aad ku tababarayso shidmida seeriga digniinta Arbacada koowaad ee bisha. Tan ayaa sidoo kale ku siinaysa xasuusin wanaagsan in aad samayso qorsheyntaada joogtada ah iyo cusboonaysiinta xogta xiriirka xaalada degdega ah.
  - Marka aad tababarayso, u sheeg ilmaha waxa aad sameynayso adoo ula hadlaaya qaab toos ah oo dagan. Adeegso jumladaha gaaban ee ay fududahay in la fahmo sida “Banaanka u baxa hada.”
9. **Marka masiibo dhacdo**
  - Isdeji oo u adeegso amarada fudud, ee toos ah ilmaha: “Hada aada qaybta hoose ee guriga.”
  - La xiriir waalidiinta carruurta sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah.
  - Diyaarso dukumiintiga ruqsada haddii wax kamid ah ilmuhu u baahan yihiin daawayn caafimaad inta lagu jiro xaalada degdega ah.
  - Kadib marka masiibo wayn ka dhacdo aaga, u dhug lahoow baahiyaha carruurta. U daa ilmaha inay hogaamiyaan kahadalka masiibada. Dami TV-ga; ilmaha yaryar ayaa aamini kara in marka dhacdo marar badan lagu soo celceliyo gudaha wararka, in ay si dhab ah u dhacayso marar badan.

#### **Gurmadka xaaladaha gaarka ah ee degdega ah**

Hoos waxaad ka helayaa shaxda ay ku qoran yihiin liiska xaaladaha degdega ah ee u baahan in la tixgeliyo, iyadoo sax la saaraayo jawaabta caadiyan laga baxsho xaalad kasta oo degdeg ah. Badel jawaabtaada haddii marxaladdu u baahato, gaar ahaana haddii ay amraan saraakiisha maxaliga ah in la sameeyo wax taas ka duwan.

| Nooca Xaaladda degdeg ah                                     | Daadguree                   | Goobta Gabaadka | Karantiil |
|--------------------------------------------------------------|-----------------------------|-----------------|-----------|
| Dabka                                                        | X                           |                 |           |
| Daadadka, daadka degdega ah                                  | X                           |                 |           |
| Dilaaca gaaska/kiimikooyinka                                 | X                           |                 |           |
| Dhacdooyinka agabka khatarta ah                              | X                           |                 |           |
| Mawjada dabka (qasab maaha in la galo "hooyga lagu dhuunto") |                             | Joog gudaha     |           |
| Dilaaca cudurka caabuqa faafa                                |                             |                 | X         |
| Shilka warshada samaysa tamarta nukleerka                    | Raac tilmaamaha maxaliga ah |                 |           |
| Dufaannada barafka iyo khataraha kale ee cimilada qaboobaha  |                             | X               |           |
| Hanqarada                                                    |                             | X               |           |
| Duufaannada                                                  |                             | X               |           |
| Dhacdooyinka rabshada wata (xirista goobta)                  |                             | X               |           |

**Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah iyo foomamka qorsheynta xaalada degdega ah – akhri** Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota. (2017, Oktoobar). [Keeping Kids Safe: Haqaha Qorsheynta Xaaladaha Degdega ah ee Bixiyaha Daryeelka Carruurta.](#)

## Dib u milicsiga

Dhowr daqiiqo ku bixi inaad ku muujiso waxa aad kusoo baratay xiisada casharkaan.  
Isticmaal meelaha banaan hoose si aad muujiso aragtidaada iyo qorshe howleedkaaga.

Xiisadaan waxaan ku bartay...

Ayadoo lagu saleynaayo waxa aan bartay, qaar kamid ah waxyaabaha aan qorsheynaayo  
in aan sameeyo...

Xiisadaan ayaa i siisay inaan bilaabo in aan ka fakaro...